



## **Sida looga qaato rafcaan go'aamada ay gadho Hay'ada maamulka waxbarashada iyo daryeelka (Myndighetsnämnd Lärande och omsorg)**

---

### **Xagee looga dacwoon karaa go'aanka?**

Go'aamada ay gaadho Hay'ada maamulka waxbarashada iyo daryeelka (Myndighetsnämnd Lärande och Omsorg) ee degmada Vårgårda (Vårgårda kommun) waxaa looga dacwoon karaa maxakamada maamulka ee Jönköping (Förvaltningsrätten i Jönköping). Rafcaanka waxaa loo diryaa ama la geynayaa;

Myndighetsnämnd Lärande och Omsorg  
Kungsgatan 45  
447 80 VÅRGÅRDA

Haddii waraqdaha rafcaanku ay soo gaadhaan Hay'ada maamulka waxbarashada iyo daryeelka wakhtigii loogu talogaley waxaa ay u Ha'adu u sii gudbin doontaa warqadaha rafcaanka Maxamakamada maamulka (Förvaltningsrätten).

### **Goorma ayaa ugu danbeyn laga dacwoon ama laga qaadan karaa rafcaan go'aanka?**

Warqadaha rafcaanku waa in ay soo gaadhaan Hay'ada maamulka waxbarashada iyo daryeekl saddex todobaad gudahood, laga bilaabo maalinta aad hesho go'aanka.

### **Sidee loo qoraa warqda rafcaanka?**

Rafcaanku waa in ahaadaa mid qoraal ah. Qoraalka waa in lagu sheegaa Go'aanka laga qaadanayo rafcaanka, waxaa tuaale ahaan la qoraaya taariikhda go'aanka la gaadhey iyo lambarka kiiska (diarienummer), waa in sidoo kale la sharaxaa sababta aad ugu aragto in go'aanku uu yahay mid qaldan iyo sida aad rabto in go'aanka loo badelo, waxaa kale oo lagu qorayaa magaca, cinwaanka, tobonka lambar ee aqoonsiga (personnummer) iyo lambraka telefoonka.

Qoraalka waa in la saxeexaa. Haddii aad rabto in lagaa caawiyo sida loo qoro warqada rafcaanka waxaa aad la xidhiidhi kartaa gacan hayaha ku qaabilisan.

---